


Macaamishu waxa laga yaabaa in ay kuula yimaadaan xog marin habaabin ah oo ay soo arkeen kana maqleen tallaalada.



Waa tan sida aad uga caawin karto iyaga helista xaqiiqooyinka.

Sixida xog qaldan.



Sidee uga caawin karaa macaamiishayda in ay aqoonsadaan xogta tallaalka ee beenta ah?

Marka macaamiishu ku arkaan ama ka maqlaan wax su'aal ka dhalan karto onlaynka ama bulshadooda dhexdeeda, waxa aad u soo jeedin kartaa in ay isweydiyaan iyagu su'aalahaan maagalka ah.

○ XAGEE XOGTU KA TIMI?

Waxa ay ka timi cisbitaal, rug caafimaad ama waax caafimaad oo maxalli ah, badanaa waa u qalantaa in la rumaysto. Waxa ay ka timi qof wadaagaya aaraa aan xaqiiqooyin la socon, iska dhaaf.

○ MIYAY ISTICMAALAYSA EREYO KA BADBADIN AH SIDA

"MARWALBA," "WELIGAA" AMA "DHAMAAN"? Tusaale ahaan: "*Weligaa* hays tallaalin" ama "*dhamaan* tallaaladu isku si bay u shaqeeyaan." Xogta caafimaadku marar dhif ah bay saa u fududahay, tallaal walbaana waa ka gaar kuwa kale.



○ **MA WAXA AY ISKU DAYAYSAA IN AY KU BAQO AMA WALAAC GELISO?**

Ma waxa ay kug hoggaminaysaa ereyo kicin ah sida "Waa tan waxa aanay doonayn in aad oggaato" ama "10 sirood oo tallaal oo kaa yaabin doona!" Haddii ay ku dareensiiso baqdin, naxdin, xanaaq, waxay u badantahay in ay been tahay.

○ **MA WAXA AY WEERARAYSAA QOF LA YAQAAN AMA URRUR IYADOO AAN WADAAGAYN XAQIIQOYIN?**

Tusaale ahaan: "Dhakhaatiirtu been bay kuu sheegayaan!" ama "dawladdu waxa ay qarinqaysa xaqiiqda ka danbaysa tallaalada!" Haddii ay sida tahay, labbo jeer feker.

○ **MA WAXA AY ISKU DAYAYSAA IN AY WAX KAA IIBISO?**

Xogo badan oo been ah baa loo isticmaalaa si oogu suuq geeyo alaabo. Haddii ay kugu riixdo in aad wax iibsato mar uun, waxa laga yaabaa in aan la aamini karin.

Iskaan garee QR koodhka, kadibna guji badhanka ay ku qorantahay **Misinformation Document** si aad u hesho mareegaha xaqiiq hubinta ee lagu taliyay iyo aggabyo kale.



Waxbadan ka ogoow

Iskaan garee QR koodhka, kadibna hoos ka eeg qaybta **Misinformation Document** si aad u hesho mareegaha xaqiiq hubinta ee lagu taliyay iyo aggabyo kale.

